

## **Tallaallada COVID-19 - macluumaadka la xidhiidha shaqeyda caafimaadka iyo badbaadada oo loogu talogaley loo-shaqeeyayaasha iyo ganacsiyada yaryar**

### **Talaalka iyo waajibaadka WHS**

Marka la eego tusaalaha Sharciyada Caafimaadka iyo Badbaadada Shaqada waa inaad hubisaa badbaadada shaqaalahaaga, naftaada iyo dadka kale ee goobta shaqada ku sugan sida ugu macquulsan ee loogu dhaqmi karo. Waxaa laga yaabaa inaad awoodin inaad gebi ahaanba baabi'isid halista shaqaalaha u nugul COVID-19 ee shaqada. Si kastaba ha noqotee, waa inaad sameysaa sida ugu macquulsan ee aad u yareyn kartid halistan.

Si loo yareeyo khataraha goobta shaqada, waa inaad:

- qaadid qiimeyn qatar ah
- tixgeli tallaabooyinka xakamaynta iyo sida ay gacan uga geysan doonaan maareynta khataraha, oo ay ka mid yihiin kala fogaanshaha jidhka, nadaafadda wanaagsan iyo nadaafadda joogtada ah - iyo sidoo kale tallaallada la heli karo
- kala tasho shaqaalaha iyo wakiillada caafimaadka iyo badbaadada (HSRs) wixii ku saabsan COVID-19 iyo tallaabooyinka xakamaynta, oo ay ku jiraan tallaallada
- go'aami tallaabooyinkee ayaa macquul ahaan loogu dhaqmi karaa goobtaada shaqada

### **Miyaan u baahanahay inaan ku daro tallaalka khasabka ah sida tallaabo xakameyn ah si aan ula kulmo waajibaadkeyga caafimaadka iyo badbaadada shaqada?**

Uma badna in shuruudaha tallaalku ay macquul ahaan ku dhaqmi karaan marka loo eego sharciyada caafimaadka iyo badbaadada shaqada.

Haddii aad u baahan tahay in shaqaalahaaga la tallaalo waxay ku xidhnaan doontaa duruufaha xilliga aad ku guda jirtid qiimeynta halista. Raadso talo haddii aad tixgelinaysid inaad u baahan tahay shaqaalahaaga in la tallaalo oo aad ka fikirtid xidhiidhka goobta shaqada, takoorka iyo arrimaha asturnaanta.

Waxaa jiri kara [amarro caafimaadka bulshada ah](#) oo u baahan tallaalka shaqooyinka qaarkood ama shaqaalaha. La soco talooyinka wakaaladaada caafimaadka.

### **Ma ka dalban karaa macaamiisha inay caddeeyaan in la tallaalay ka hor intaaney soo gelin goobtayda shaqada?**

Uma badna in shuruudca caafimaadka iyo badbaadada shaqada ay kaa dooneyaan inaad weydiisid macaamiisha iyo booqdayaasha caddeynta tallaalka ah. Kahor intaanad saarin shuruud noocaan ah, raadso talo maxaa yeelay waxaa jiri kara arrimo asturnaan iyo takoorid ah.

## **Shaqaalahaygu ma diidi karaan inay shaqeeyaan maxaa yeelay shaqaale kale oo aan la tallaalin awgeed?**

Shuruucda WHS, shaqaaluhu wuu joojin karaa ama diidi karaa inuu qabto shaqada haddii ay qabaan walaac macquul ah oo khatar weyn u leh caafimaadka ama badbaadada isla markiiba ama u soo dhowaanshaha halista.

Xaaladaha badankood, shaqaale ma awoodi doono inuu ku tiirsanaado sharciyada caafimaadka iyo badbaadada shaqada si uu u joojiyo shaqada si fudud sababtoo ah shaqaale kale oo aan la tallaalin awgeed.

## **Mayaan qaadayaa masuuliyad shuruucda caafimaadka iyo badbaadada shaqada haddii aanan ka dhigin in shaqaalahayga la tallaalo oo midkood uu qaado COVID-19?**

Waxay u egtahay inaad jabinin shuruucda shaqada iyo caafimaadka si fudud sababtoo ah uma baahnid shaqaalaha inay is talaalaan.

Waa inaad sii wadaa inaad ka hirgalisid dhamaan talaabooyinka macquulka ah ee xakameynta goobtaada shaqada, sida kala fogaanshaha jidhka, nadaafada wanaagsan iyo nadaafada joogtada ah iyo dayactirka, xitaa hadii shaqaalaha la talaalayo.

## **Macluumaad dheeraad ah**

- [Macluumaadka caafimaadka iyo tallaalada - Waaxda Caafimaadka](#)
- [Shaqee caafimaadka iyo badbaadada - Shaqada Badqabka Australiya \(Work health and safety - Safe Work Australia\)](#)
- [Xuquuqda Meesha shaqada - Fair Work Ombudsman](#)